



Wasaaradda Hormarinta Maaliyadda
Waaxda Kastamada Somaliland

HAGEYAASHA XARAASHKA KASTAMDA

1. Hordhac

Xeerka Kastamada Xeer Lr. 73/2016 waxa uu awood u siinayaa Hay'adda Kastamada in in ay ku tasarufto baddeecaddaha la qabtay, laga tagay ama dhaafay muddadii loogu talagalay in ay in laga saaro kastamda sida ay sheegayaan Xeer-nidaamiyeyaasha Xeerka Kastamada ee 03/2019.

libka baddeecaddahan haddii lagu dhammeeyo habka xaraashka kastamada, wuxuu xaqiijinayaa adeegsiga habraacyo daahfuran iyo in si isku mid ah loola dhaqmo dhammaan dadka danaynaya iibsiga baddeecaddaas.

2. Ogaysiiska xaraashka

Ugu yaraan 15 maalmood ka hor taariikhda xaraashka, ogaysiiska la galinayaa mareegta Wasaaradda Hormarinta Maaliyadda, baraha bulshada, jaraa'idka dawladda iyo jaraa'idada qaranka iyada oo la sheegayo:

- i. Taariikhda, wakhtiga iyo goobta xaraashka;
- ii. Faahfaahinta baddeecadda la xaraashayo oo ay ku jiraan sawiro haddii ay suurtagal tahay;
- iii. Lambarka gaarka ah (lot number) ee aqoonsiga baddeecadda la xaraashayo; iyo
- iv. Taariikhaha iyo wakhtiga loo cayimay in la arko baddeecadda.

Ogaysiisyada waxa loo dirayaa Rugta Ganacsiga iyo ururada kale ee wax soo-dajiya/ganacsatada ku sugan meesha xaraashka lagu qabanayo; waxayna lagu soo bandhigayaa Xarunta Guud ee Kastamada iyo Xarunta Kastamka baddeecadda la xaraashayo lagu hayo.

Maamulaha Kastamka baddeecadu taal ayaa diyaarinaya iibsadeyaasha suurtagalka ah si ay u soo eegaan/baadhaan baddeecadda bakhaarka taal inta u dhaxaysa 14: 00 iyo 16:00 saac ee maalmaha Sabtida, Isniinta iyo Arbacada ka hor taariikhda xaraashka.

ugu yaraan todoba (7) maalmood ka hor xaraashka. Galitaanka bakhaarada Dekedda Berbera ee ay maamusho Shirkadda DP World waa inay shirkaddu fududaysaa

libsade kasta waxa laga soo qaadayaa in uu baddeecadda baadhay/eegay iibkana uu iskii u sameeyay. Baddeecaddaha waxa lagu iibinayaa laguna bixinayaa xaaladda ay yihiin wakhtiga iibka, Waaxda Kastamaduna masuul kama noqon karto wixii waxyeelo, cilado ama nusqaan ah ama wixii khalad fahan ah ee ka dhasha faahfaahinta baddeecadda la iibinayo ee la baahiyay

Kastamadu ma damaanad qaadayaan tayada, turrada, xaaladda cabaynta ama xogaha kale ee ku saabsan baddeecadda iibka loo bandhigay ama la iibinayo.

3. Shuruudaha iibsadaha

Qof kasta ayaa ka qaybgali kara xaraashka, haddii uu:

- a) Ka weyn yahay 16 sano;



Wasaaradda Hormarinta Maaliyadda
Waaxda Kastamada Somaliland

- b) Degan yahay Somailland;
- c) Leeyahay Lambar Aqoonsi Cashuureed oo sax ah;
- d) Haysto ruqsadda Soo dejinta ee Wasaaradda Ganacsiga, Warshadaha iyo Dalxiiska;
- e) Aanay Hay'adda Kastamadu ka reebin in uu ka qaybgalo xaraashka.

4. Fulinta Xaraashka

Qiimaynta hordhac ah ee qiimaha baddeecadda lagu iibinayo ayay kastamadu samaynayaan ka hor iibkooda lacagtaana waxa loo qaadanayaa in ay tahay qiimaha iibka ee ugu yar.

Hay'adda Kastamadu waxa ay go'aamin doontaa nooca habka iibka ee xaalad kasta. Qandaraasyada/qorsheyaasha iibka waxa lagu samayn karaa bushqado xidhan/ dalab gaarah, hab online ah, xaraash guud ama isku gaynta hababka iibka.

- a) Bushqadda xidhan/dalabka gaarka ah: libsaduhu waxa uu kaga qayb qaadanayaa xaraashka isaga oo soo gudbinaya bushaqad xidhan/dalab gaar ah isaga oo tilmaamaya lambarka gaarka ah ee aqoonsiga ((lot number) iyo lacagta iibka una soo gudbinaya kastamada ka hor maalinta xaraashka. Bushaqada xidhan/dalabka gaarka ah waxa la furayaa maalinta xaraashka waxana furaya Maamulaha Kastamka baddeecaddu;
- b) Iibka online-ka ah: libsadeyaashu waxay soo gudbinayaan qiimaha ay doonayaan in ay bixiyaan iyaga uu ku soo gudbinaya ciwaanka emailka loogu talagalay (helitaanka dalabyada la soo gudbiyay waa in la xaqiijiyo). Dalabyada waa la diwaangalin doonaa lana qiimayn doonaa maalinta xaraashka;
- c) Maalinta xaraashka dadweynaha ayaa Af ahaan siyaabahan soo socda ku dalban kara mid kasta oo ka mid ah baddeecadda la xaraashayo:
 - i. Maalinta xaraashka iibsadeyaasha waxa fursad loo siinayaa in ay galaan goobta xaraashka loogu talagalay. Hay'adda kastamada ayaa magacaabaysa sarkaalka kastamada ah oo noqonaya xaraashe (auctioneer) si uu u kormeero xaraashka isaga oo raacaya habraacan soo socda.
 - ii. Ka hor bilawga iibka (bidding), xaraashuhu waxa uu ku dhawaaqayaa lambarka gaarka ah ee aqoonsiga (lot number) ee baddeecadda la xaraashayo iyo faahfaahinta baddeecadda.
 - iii. Xaraashuhu waxa uu ku dhawaaqayaa qiimaha uu ka bilaabmayo iibku (bushqada xidhan ee ugu saraysa/dalabka gaarka ah), iibsadeyaashuna waxay caddaynayaan in ay doonayaan in ay kordhiyaan qiimaha bilawga iyo lacag kasta oo iib oo ku xigta ilaa wax dalab ah la samayn waayo. Halkaa marka la marayo, qofka qiimaha ugu sareeya ku dalbada baddeecadda ayaa helay baddeecaddaas.

La aqbali mayo haddii iibku ka hooseeyo qiimaha iibka ee hordhaca ah. Sarkaalka maamulayaa kuma qasbana in uu aqbalu qiimaha u sareeya ama iibkaba.



Wasaaradda Hormarinta Maaliyadda Waaxda Kastamada Somaliland

5. Bixinta lacagta iibabka/dalabyada la ogolaaday

Lacag dhigaal ah oo boqolkiiba konton (50%) ah qiimaha ugu sareeya ee iibka la ogolaaday ayuu iibsaduhu si degdeg ah u bixinayaa kadib marka iibka kama danbeysta ah la ogolaado. Haddii lacagta dhigaalka ah aan la bixin, iibkaas waa la burinayaa, baddeecaddana waxa laga iibin karaa iibsadaha labaad ee ugu qiimaha sareeya, ama dib ayaa loo xaraashi marba sidii loo arko munaasib.

Baaqiga (balance) lacagta iibka waxa uu bixinayaa iibsadaha guulaystay iyada kaash ama jeeg (cheque) ah (lana socoto warbixin bangi oo uu ku caddaynayo haynta baaqiga) sida uu tilmaamyo Agaasimuhu muddo todoba maalmood gudahood oo aanay ku jirin maalmaha fasaxa ahi kana bilaabma ogolaanshaha kama danbeysta ah ee iibka.

Haddii baaqiga lacagta iibka aan lagu bixin muddada la cayimay, lacagta dhigaalka ah waxa la wareegaysa Wasaaradda Hormarinta Maaliyadda baddeecaddana dib ayaa xaraash ama si kale loogu iibinayaa.

Haddii iibsadaha guulaystay awoodi waayo ama diido in uu u hogaansamo qodobada hageyaashan, Agaasimaha Kastamadu waxa uu xaq u leeyahay in uu baddeecadda ka iibiyo iibsade kale ama bilaabo hab xaraash cusub. Agaasimaha Kastamadu wuu u diidi karaa iibsadaha ku guuldaraystay in uu u hogaansamo hageyaashan in uu ka qaybgalo xaraasho kale dheeraad ah.

6. Soo saarista xaqiijinta iibka xaraashka ee Kastamada

Hay'adda Kastamadu waxay soo saaraysaa xaqiijin ay ku xaqiijinayso iibka xaraashka iyada oo sheegaysa magaca iyo ciwaanka iibsadaha ku guulaystay iibka, kaadhkiisa aqoonsiga/lambarka baasaaboorkiisa iyo Lambarka Aqoonsiga Cashuurta, taariikhda iyo goobta xaraashka, lambarka gaarka ah ee aqoonsiga baddeecadda la xaraashay (lot number), faahfaahinta buuxda iyo tirrada baddeecadda la iibsaday ee iibkeeda la aqbalay iyo qiimaha baddeecaddahan lagu iibiyay.

Iibsadaha guulaystay waxa uu keenayaa xaqiijinta iibka ee Maamulaha Kastamka baddeecaddu taalaa u soo saaray. Kastamadu waxa ay bixinayaan baddeecaddaha lagu sheegay amarka bixinta iyaga oo siinaya iibsadaha, kastamada iyo iibsaduhuna waxa ay saxaaxi doonaan xaqiijinta iibka si ay u xaqiijiyaan in baddeecadda la fasaxay ama la guddoomay

7. Dib ka bixinta lacagaha isbedelada (Refund of adjustments)

Lacagta dhigaalka ah waxa laga jarayaa bixinta kama danbeysta ah ee dhammaan lacagta iibka laakiin haddii aanay iibka aqbalin hay'adda ay khusaysaa, xaddiga lacagta dhigaalka ah waxa loo celinayaa iibsadaha.

8. Awoodda Agaasimaha ee joointa xaraashka iwm –

- lyada oon waxba loo dhimmayn waxyaabaha lagu sheegay habraacan, Agaasimuhu wuxuu:



Wasaaradda Hormarinta Maaliyadda
Waaxda Kastamada Somaliland

- i. Joojin karaa gabi ahaanba xaraashka dhacaya.
 - ii. Aqbali karaa ama diidi karaa wixii iib ama dalab ah ee xaraashka wakhti kasta ka hor inta aan baddeecadda lagu wareejin iibsadaha ku guulaystay. Sidoo kale waxa uu dib u dheegan karaa hadal qoraaladii wuxuna amri karaa in baddeecadda la soo celiyo xataa dib bixinta baddeecadda haddii ay caddaatay in ay isku day ku talagal ah oo khasaare lagu gaadhsiinayay danta guud; wuxuuna
 - iii. Xadidi karaa ama diidi karaa in ay dadku galaan dhismeyaasha meesha xaraashka lagu qabanayo ama kaqaybgalkooda xaraashka.
- b) Iyada oon waxba loo dhimmayn habraacyada lagu sheegay xaga sare, Agaasimuhu waxa uu soo saari karaa amaro guud iyo kuwo gaar ah oo lagu maamulayo xaraashka haddii uu u arko munaasib si loo ilaaliyo danta guud